

Sharciga lamba. 28 ee 25 Feberaayo 1973.

Wax ka Baddalka Adeegga Daawayntaa Xoolaha ee Lacag la'aanta.

GUDDOOMIYAH A GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Warqadda Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

Marka uu arkay Xeerka 26 Juun 1970, lamba. 34 kaasoo lagu dhisay Wakaaladda Horumarinta Xannaanada Xoolaha;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in laga dhigo lacag la'aan daawada isticmaalka Daaweynta Xoolaha iyado ulajeeddadu tahay in la kobciyo keydka Xannaanada Xoolaha iyo in la baabi'yo nooc kasta oo canshuur ah ama wax kale ee la xariirira soo dhoofintooda;

Marka uu helay Oggolaashaha Golaha Kacaanka iyo Golaha Wasiirada;

WUXUU MEELMARIYAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Dalka oo dhan waxaa laga dhigay lacag la'aan daawada iyo adeegga Daaweynta ee loogu talagalay xoolaha nool.

Qod. 2

Wax soo saarka daawada iyo adeegga Daaweynta Xoolaha ee Xeerkaan ku xusan waxaa laga dhaafay canshuur nooc kasta iyo wax kalaba.

Qod. 3

Waxaa ka reeban dadka gaarka haysashada shaqsi ee daawooyinka loo adeegsado Daaweynta Xoolaha.

Haysashadaasu waa dambi oo la isku ciqaabayo sida xeerku qabo.

Qod. 4

Dekereeto Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaankaa ayaa kadib marka uu talo ku soo jeediyo Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ayaa lagu soo saarayaa xeer nidamiye si habboon si loogu fuliyo Xeerkaan.

XEER nidaayahaas ayaa lagu caddaynaya taariikhda ay ka bilaabanayso lacag la'aanta Daaweynta Xoolaha.

Qod. 5

Xeerkaan si deg-deg aha ayuu u dhaqangalayaa waxaana lagu faafinaya Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 25 Feberaayo 1973

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre